# Ogeysiiska Xeerarka Xog-dhawrista

## Barnaamijyada Cilladaha Isticmaalka Maandooriyaha

### Waxaa Naga Go'an Ilaalinta Xogtaada

Sharciga federaalku wuxuu ilaaliyaa sirta diiwaannada bukaanka qaba cilladaha isticmaalka maandooriyaha.

Ogeysiiskani wuxuu qeexayaa:

- SIDA MACLUUMAADKA CAAFIMAADKA EE ADIGA KUGU SAABSAN LOO ISTICMAALI KARO OO LOONA SHAACIN KARO
- XUQUUQAHA AAD U LEEDAHAY MACLUUMAADKAAGA CAAFIMAADKA
- SIDA LOO SOO GUDBIYO CABASHO KHUSEYSA KU XADGUDUBKA XOG-DHAWRISTA AMA AMNIGA MACLUUMAADKAAGA CAAFIMAADKA, AMA XUQUUQAHA AAD U LEEDAHAY MACLUUMAADKAAGA

WAXAAD XAQ U LEEDAHAY INAAD HESHO NUQULKA OGEYSIISKANI (WARQAD AHAAN AMA FOOM ELEKTRONIK AH AHAAN) IYO INAAD KALA HADSHO XAFIISKA COREWELL HEALTH PRIVACY OFFICE LAMBARKA **616.486.4113** AMA **privacy@corewellhealth.org** HADDII AAD QABTO WAX SU'AALO AH.

Dhawrista macluumaadkaaga caafimaadka ayaa had iyo jeer mudnaan inoo lahayd haddii aynu nahay Corewell Health. Ogeysiiskani wuxuu siinayaa bukaanada qaba cilladaha isticmaalka maandooriyaha ee Corewell Health macluumaad ku saabsan xuquuqdooda xog-dhawrista iyo ka go'naanshaha joogtada ah ee ay Corewell Health ku ilaalinayso xuquuqahaas. Waxaad xaq u leedahay inaad gaarto dookhyo ku aadan qaabka macluumaadkaaga caafimaadka loo uruursho loona adeegsado.

### Ogeysiiska Xeerarka Xog-dhawrista

Ogeysiiskani wuxuu qeexayaa sida macluumaadka daaweynta cilladaha isticmaalka maandooriyaha ee adiga kugu saabsan loo isticmaali karo loona shaacin karo iyo sida aad u heli karto macluumaadkani. Ogeysiiskani ayaa lagu siin doonaa waqtiga diiwaangelinta barnaamijka cilladaha isticmaalka maandooriyaha ama, haddii aadan awoodin inaad waqtigaasi wax fahamto xaaladdaada caafimaad awgeed, isla marka aad awood u yeelato inaad wax fahamto. **Fadlan si taxaddar leh dib ugu eeg ogeysiiskani**. Ogeysiiskani wuxuu dhaqangalayaa laga bilaabo Febraayo 16, 2026.

### Yaa Ku Dhaqmaaya Ogeysiiskani

Ogeysiiskani wuxuu khuseeyaa Barnaamijyada Caafimaadka ee Corewell ama Bixiyeyaasha bixiya daaweynta cilladaha isticmaalka maandooriyaha ama adeegyada hoos yimaada Qaybta 2-aad ee 42 CFR (Part 2). Isbeddel kasta oo lagu sameeyo Ogeysiiskani Xeerarka Xog-dhawrista ayaa laga heli karaa xafiiska ama xarunta aad ka helayso daryeelka, adoo wacaya lambarka **616.486.4113**, ama iimayl u diraaya **privacy@corewellhealth.org**.

### Balan-qaadkeena Ku saabsana Macluumaadka Caafimaadka

Waan fahamsanahay in macluumaadkaagu yahay mid kuu gaar ah, waxaana naga go'an inaan ilaalino xogtaada. Macluumaadka caafimaadka ee aan adeegsano, abuurno, hayno, oo aan shaaca ka qaadno ee adiga kugu saabsan waxaa laga yaabaa inuu la xiriiro daryeelka caafimaadka jirka iyo maskaxda ee aad naga hesho iyo barnaamijyadayada Part 2 Programs. Waxaan samaynaa diiwaanka daryeelka iyo adeegyada aad ka hesho Corewell Health. Diiwaankani ayaa inoo sahlaaya inaan ku siino daryeel tayo leh iyo inaan u hoggaansano shuruudaha qaar ee sharciga ah. Ogeysiiskani ayaa khuseeya dhammaan diiwaannada Part 2 ee la xiriira daryeelkaaga ee ay hayso Corewell Health, haddii ay yihiin elektaroonig ama warqad. Haddii dhakhtarka ku siinaaya daryeelka uusan xubin ka ahayn kooxda Corewell Health, waxaa laga yaabaa inuu lahaan karo siyaasado ama ogeysiisyo kale oo khuseeya isticmaalka iyo shaacinta macluumaadkaaga caafimaadka. Ogeysiiskani ayaa xog kaa siinaaya qaababka macluumaadkaaga caafimaadka ee barnaamijka Part 2 loo adeegsado ama loo shaaciyo. Sidoo kale wuxuu qeexayaa xuquuqdaada iyo waajibaadkaaga khuseeya adeegsiga iyo shaacinta macluumaadka caafimaadka ee cilladaha isticmaalka maandooriyaha.

Sharciga ayaa naga doonaya inaan:

- Joogteyno xog-dhawrista iyo amniga macluumaadkaaga caafimaadka ee la ilaaliyo (PHI) - oo ay ku jiraan macluumaadkaaga caafimaadka ee Part 2.
- Siino bukaanada ogeysiis ku saabsan waajibaadkayaga sharciga ah iyo xeerarka xog-dhawrista marka loo eego diiwaanada Part 2.
- Raacno xeerarka xog-dhawrista ee lagu sharraxay ogeysiiska hadda shaqaynaya.
- Bixino nuqulka ogeysiiskan marka la codsado.
- La socodsiino shakhsiyaadka ay dhibaatadu saamaysay kadib jabsashada macluumaadka caafimaadka ee aan sugnayn – oo ay ku jiraan macluumaadka cilladaha isticmaalka maandooriyaha.

### Xaqa Oggolaanshaha iyo Ka Noqoshada

Hal oggolaansho oo keliya ayaad u bixin kartaa dhammaan isticmaalka ama shaacinta mustaqbalka ee laga leeyahay ujeeddooyinka daaweynta, lacag-bixinta, ama hawlaha daryeelka caafimaadka ee loogu talagalay macluumaadkaaga caafimaadka ee Part 2 (sida macluumaadka noocaas ah loo isticmaali karo ayaa qaybta hoose looga hadli doonaa).

Waad la noqon kartaa oggolaanshahaaga wakhti kasta, marka laga reebo ilaa xad inta ay Corewell Health ku tiirsan tahay oggolaanshaha. Diiwaanada loo shaaciyo Part 2 Program, hay'adda caymiska leh, ama danwadaagta ganacsi iyadoo la raacayo oggolaanshaha qoran ee bukaanka ee loogu talagalay daaweynta, lacag-bixinta, iyo hawlaha daryeelka caafimaadka waxaa sii shaacin kara barnaamijka Part 2, hay'adda caymiska leh, ama danwadaagta ganacsi, iyadoo aan la helin oggolaanshaha qoraalka ah ee bukaanka, ilaa xad inta ay qawaaniinta HIPAA ay ka oggol yihiin shaacinta noocaas ah.

## Sida Aan U Adeegsan Karno ama U Shaacin Karno Macluumaadkaaga Caafimaadka

**Loogu talagalay daaweynta:** Waxaan xogtaada caafimaadka u isticmaali karnaa oo u shaacin karnaa xirfadleyaasha kale ee caafimaadka ee ku daaweynaya. Tusaale ahaan, dhakhtarka kaa daaweynaya dhaawac ayaa dhakhtar kale ka codsan kara xaaladda caafimaadkaaga guud.

Waxaa laga yaaba inaan u shaacino macluumaadkaaga caafimaadka si loo sii wado daryeelkaaga. Waaxaha kala duwan ee Corewell Health ayaa shaacin karaan macluumaadkaaga caafimaadka si la iskugu dubarido waxyaabaha kala duwan ee aad u baahan tahay, sida daawooyinka dhakhtarku kuu qoro, baaritaanada shaybaarka, raajooyinka, raajooyinka, ama terabiga, ama si la iskugu dubarido adeeg ku xirista.

**Loogu talagalay lacag-bixinta:** Waxaan u isticmaali karnaa una shaacin karnaa macluumaadkaaga caafimaadka iyo macluumaadkaaga aan kan caafimaadka ahayn si aan uga dalbano ugana helno caymisyada caafimaadka ama wakaaladaha kale kharashka daawada iyo adeegyada aad ka heshay Corewell Health. Tusaale, waxaan macluumaadkaaga siin karnaa qorshaha caymiskaaga si ay u dhiibaan kharashka daryeelkaaga caafimaadka ama adeegyadaada. Waxaan u sheegi doonaa shirkadda caymiska caafimaadkaaga wax ku saabsan daawada aad helayso si aan u helno oggolaanshaha hore ama aan u go'aamino in caymiskaagu uu dhiibaayo daawada.

Haddii aad si buuxda u dhiibtay kharashka ama adeegga daryeelka caafimaadka, aadna noo sheegto in aadan dooneyn in caymiskaaga caafimaadku uu helo macluumaad ku saabsan shaygaas ama adeegaas, ma siin doono macluumaadkaas shirkadaada caymiska, ilaa nalooga baahdo mooyaane sharci ahaan in sidaas la sameeyo.

**Loogu talagalay Hawlgallada Daryeelka Caafimaadka:** Waxaan adeegsan karnaa aana shaacin karnaa macluumaadkaaga caafimaadka si aan u socodsiino ganacsigeena—sida xisaabaadka, ka shaqeynta dacwadaha, ama qiimeynta shaqaalaheena. Isticmaaladaan iyo shaacinadaan ayaa muhiim u ah maaraynta hawlaha ganacsiga ee Corewell Health iyo xaqiijinta in dhammaan bukaanadeena ay helaan daryeel tayo leh.

Waxaan isku dhafi karnaa macluumaadka caafimaadka ee aan hayno iyo macluumaadka caafimaadka ee ay hayaan ururada kale si aan si aan u barbar dhigno waxqabadkeena oo aan u go'aamino sida aan u hormarin karno daryeelka iyo adeegyada aan bixino.

**Hanti-dhawrka Maamulka, Hanti-dhawrka Maaliyadda iyo Qiimeynta Barnaamijka:** Waxaa laga yaabaa inaan macluumaadkaaga u shaacino cidda mas'uulka ka ah sameynta hawlaha hanti-dhawrka iyo qiimeynada, marka qofku oggolaado xaddidaadyo gaar ah oo khuseeya shaacinta macluumaadka. Hanti-dhawrka waxaa ka mid ah laakiin aan ku koobna hanti-dhawrka ay sameeyaan hay'adaha dawladda federaalka, gobolka, iyo dawladda hoose, iyo sidoo kale bixiyeyaasha kale iyo/ama qorshayaasha caafimaadka si loola socdo nidaamka daryeelka caafimaadka, barnaamijyada dawladda iyo u-hoggaansanaanta sharciyadda xuquuqda madaniga.

## Sida Aan U Adeegsan Karno Oo U Shaacin Karno Macluumaadkaaga Caafimaadka - Xaaladaha Gaarka ah

**Gurmadka Caafimaad:** Haddii ay dhacdo xaalad degdeg ah oo caafimaad, waxaan shaacin karnaa macluumaadka aqoonsiga bukaanka iyadoo aan la helin oggolaanshahaaga qoraalka ah, laakiin keliya ilaa xad inta lagama maarmaanka u ah in shaqaalaha caafimaadka marka ay ka jawaabayaan xaaladda degdegga ah.

**Qoraallada La-talinta iyo Macluumaadka Sirta Sare leh:** Macluumaadka caafimaadka qaarkood waxay helaan dhawris xogeed oo gaar ah, sida qoraallada daaweynta maskaxda iyo qoraallada la-talinta cilladaha isticmaalka maandooriyaha (qoraallada uu si gaar ah u hayo dhakhtarka falanqeeya kalfadhiga la-talinta), adeegyada caafimaadka dhimirka iyo naafanimada korriinka, iyo cudurrada qaarkood. Waxaan adeegsan doonaa ama baahin doonaa macluumaadkaaga sida sare loo dhawro ee caafimaadka keliya inta sharcigu oggol yahay ama naga doonaayo, ama marka aan helno oggolaanshahaaga qoran.

Si kastaba ha ahaatee, qoraallada la-talinta ee Part 2, waxaan shaacin karnaa iyadoo aan la helin oggolaansho qoraal ah (i) daaweynta uu sameeyo bixiyaha diyaariyay qoraallada la-talinta; (ii) barnaamijyada tababarka ee ardayda, tababarayaasha ama xirfadlayaasha daaweynta SUD ama barnaamijyada caafimaadka dhimirka; iyo/ama (iii) loogu talagalay in Corewell Health looga difaaco dacwad sharci ah ama dacwad kale oo uu keeno bukaanka.

**Khataraha Caafimaadka Dadweynaha:** Waxaa laga yaabaa inaan shaaca ka qaadno macluumaadka caafimaadka ee loogu talagalay hawlaha caafimaadka dadweynaha, si looga hortago ama loo xakameeyo cudurrada, dhaawaca, ama naafanimada. Macluumaadka la bixiyay waa in laga saaro xogta la isku aqoonsan karo si aysan u jirin sabab macquul ah oo lagu aamino in macluumaadka loo isticmaali karo in adiga lagu aqoonsado.

**Hawlaha Uruurinta Lacagaha Deeqaha ah:** Corewell Health ayaa isticmaali karta ama shaacin karta diiwaannada si ay u ururiso lacagaha deeqaha si loogu faa'iideeyo barnaamijka Part 2 oo keliya haddii adiga, oo bukaanka ah, marka hore lagu siiyay fursad cad oo muuqata oo aad ku dooran karto inaadan helin wadaxiriirada uruurinta lacagaha deeqaha. Haddii aad oggolaato, waxaa laga yaabaa inaan isticmaalno macluumaad gaar ah oo kan caafimaadka ahayn si aan kuula soo xiriirno si aan lacagaha deeqaha ah ugu uruurino hay'adaha Corewell Health iyadoo loo marayo hay'ad ay leedahay ama maamusho Corewell Health.

**Dembiyada ka dhaca Dhismaha:** Waxaa laga yaabaa inaan shaaca ka qaadno macluumaadka saraakiisha fulinta sharciga kaasi oo si toos ah ula xiriira dembi ka dhaca dhismaha ama dembiga ka dhanka ah shaqaalahayaga ama hanjabaada in la galo dembi noocaas ah.

**Nidaamka Sharciga Dembiyada:** Haddii laguu xilsaaray daaweynta nidaamka sharciga dembiyada (oo ay ku jiraan maxkamadda dembiyada daroogada, tijaabo siideyn, ama siideyn) oo aad saxiixdo oggolaansho saamaxaya shaacinta qaybaha nidaamka sharciga dambiyada sida maxkamadda, saraakiisha siideynta macluumaadka, saraakiisha siidaynta macluumaadka, xeer-ilaaliyeyaasha, ama hay'adaha kale ee fulinta sharciga, xuquuqdaada inaad ka noqoto oggolaanshaha ayaa laga yaabaa inay aad u xaddidanaato waana in si cad loogu sharraxaa oggolaanshaha aad saxiixdo.

**Ilaalinada Sharciga ah:** Diiwaanada, ama marag-furka gudbinaya waxa ku jira diiwaannada noocaas ah, looma isticmaali karo ama lama shaacin karo dacwado madani ah, maamul, dembi, ama sharci-dejin awgood oo adiga kaa dhan ah haddii aan lagu salaynin oggolaanshahaaga qoran ee gaarka ah ama amar maxkamadeed mooyaane. Diiwaanada waxaa la isticmaali doonaa ama la shaacin doonaa oo keliya iyadoo lagu saleynayo amar maxkamadeed kadib ogeysiiska oo fursad lagugu dhageysto ayaa adiga lagu siin doonaa (bukaanka) iyo/ama qofka haysta diiwaanka, marka uu nooga baahan yahay sharciga 42 USC § 290dd-2 iyo 42 CFR Part 2. Amarka maxkamadda ee oggolaanaya isticmaalka ama shaacinta waa inuu la socdaa u yeeritaan maxkamadeed ama amar sharci ah oo kale oo la mid ah mid khasabaya shaacinta kahor inta aan diiwaanka la isticmaalin ama aan la shaacin.

**Cilmi-baarista:** Waxaa laga yaabaa inaan macluumaadkaaga u isticmaalno oo aan u shaacino cilmi-baaris awgeed haddii shuruudo gaar ah la buuxiyo.

**Warbixinnada Ku Saabsan Ku Xadgudubka iyo Dayacaadda Carruurta ee La Tuhunsan Yahay:** Waxaa laga yaabaa inaan shaaca ka qaadno macluumaadka loo baahan yahay si dhacdooyinka ku saabsan ku xadgudubka iyo dayacaadda carruurta ee laga shaki qabo loogu soo sheego maamulka gobolka ama kan degmada ee ku habboon. Si kastaba ha ahaatee, waxaa laga yaabaa inaan shaaca ka qaadin diiwaanka bukaanka ee asalka ah, oo ay ku jiraan dacwadaha madaniga ah ama kuwa dembiyada ee ka soo ifbixi kara warbixinta khuseeya ku xadgudubka iyo dayacaada carruurta ee la tuhunsan yahay, iyadoo aan la helin oggolaansho.

**Soo Sheegida Dhimashada:** Waxaa laga yaabaa in macluumaadkaaga la xiriira sababta dhimashada keentay aan u shaacino hay'adda caafimaadka dadweynaha ee loo idmaday inay hesho macluumaadka noocaas ah.

**Isticmaalka Kale ee Macluumaadkaaga Caafimaadka:** Isticmaallada kale iyo shaacinnada macluumaadka caafimaadka ee uusan daboolin ogeysiiskani ama sharciyadda kale ee khuseeya Corewell Health ayaa la dabaqi doonaa marka aan kaa helno oggolaansho qoran. Haddii aad noo oggolaato inaan adeegsano ama shaacino macluumaadkaaga caafimaadka, waad uga laaban kartaa oggolaanshahaaga qaab qoraal ah wakhti walba aad doonayso. Haddii aad ka laabato oggolaanshahaaga, ma adeegsan doono ama shaacin doono macluumaadka caafimaadka ee adiga kugu saabsan sababaha ku qoran oggolaanshahaaga qoran awgood. Ma awoodi doono inaan ka laabano shaacino kasta oo aan horay ugu samaynay oggolaanshahaaga, waxaana nalaga doonayaa inaan hayno diiwaanada daryeelka ee aan ku siinay.

## Xuquuqahaaga Khuseeya Macluumaadka Caafimaadka

**Xaqa Kormeerka iyo Nuqulka:** Waxaad soo codsan kartaa in aad aragto ama aad nuqul elektaroonig ah ama warqad ah ka hesho diiwaankaaga caafimaadka iyo macluumaadkaaga kale ee caafimaadka ee aan kaa hayno. Macluumaadka aad helayso waxaa ku jira diiwaanada iyo kharashka caafimaadka laakiin kuma jiraan macluumaadka caafimaadka dhimirka. Nuqul ama macluumaad kooban ayaan kaa siin doonaa macluumaadkaaga caafimaadka, sida caadiga ah 30 maalmood gudahooda kadib marka aad codsato. Waxaa laga yaabaa inaan kaa qaadno khidmad macquul ah oo ku salaysan khidmadda. Waxaa laga yaabaa inaan diidno codsigaaga inaad kormeerto iyo inaad nuqul hesho mararka qaarkood. Haddii laguu diido inaad hesho macluumaadka caafimaadka, waxaad codsan kartaa in diidmada dib u eegis lagu sameeyo. Xirfadle kale oo caafimaad oo ruqsad haysta oo ay xulatay Corewell Health ayaa dib u eegis ku samayn doona codsigaaga iyo diidmada. Qofka samaynaya dib u eegista ayaan noqon doonin qofka diiday codsigaagii hore. Waan u hoggaansami doonaa natiijada dib u eegista. Haddii aad ka qayb qaadanyso hawlaha cilmi-baarista, waxaan diidi karnaa codsigaaga eegista iyo nuqul ka helida qaar ka mid ah macluumaadkaaga caafimaadka ee khusaysa cilmi-baaristaas, marba haddii aad oggolaatay xaddidaada helitaanka noocan ah markii aad saxiixday foomka oggolaanshaha kahor inta aadan ka qayb qaadan. Waxaan sidoo kale diidi karnaa helitaanka haddii uu sharcigu oggolaado mooyee.

**Xaqa Wax-ka-beddelka:** Waxaad weydiisan kartaa Waaxda Maareynta Macluumaadka Caafimaadka inay saxdo macluumaadka caafimaadka ee adiga kugu saabsan ee aad u malaynayso inuu khaldan yahay ama aan dhammaystirnayn. Codsigaaga waan "diidi", karnaa laakiin sababta ayaan kuu sheegi doonaa si qoraal ah 60 maalmood gudahooda. Waan diidi karnaa codsigaaga wax ka beddelka haddii uusan ahayn mid qoraal ah aysana ku jirin sabab taageeraysa codsiga. Sidoo kale waan diidi karnaa codsigaaga haddii aad naga codsato inaan wax ka beddelno macluumaadkaaga:

- Aanaan anagu abuurin, haddii qofka ama hay'adda abuurtay macluumaadka aan imminka la heli karin mooyee si ay wax ka beddelka ugu samayso.
- Aan qaybta ka ahayn macluumaadka caafimaadka ee ay hayso wakaalada Corewell Health.
- Aan qaybta ka ahayn macluumaadka aad xaqa u leedahay inaad akhrido aadna nuqul ka hesho.
- Uu yahay mid sax ah oo dhammaystiran.

**Xaqa Xisaab-xirka Shaacinada:** Waxaad naga soo codsan kartaa liiska (xisaab-xirka) aan wadaagnay macluumaadkaaga caafimaadka ilaa iyo lix sano oo kahor taariikhda codsigaaga, cida aanu la wadaagnay, iyo sababta aan ula wadaagnay. Weydiiso Waaxda Maareynta Macluumaadka Caafimaadka sida loo codsado arrintani. Waxaan kuu soo direynaa dhammaan shaacinada khuseeya daaweynta, lacag-bixinta, iyo hawlaha kale ee daryeelka caafimaadka, iyo shaacinada kale ee gaarka ah (sida mid kasta oo aad adigu naga soo codsatay in aan sameyno). Si bilaash ah ayaan halkii sanaba u bixin doonaa xisaab-xirka aad naga codsato laakiin waxaan kugu soo dallacaynaa khidmad yar oo macquul ah, oo ah kharashka la galayo haddii aad mar labaad qoraalka naga soo codsato ilaa iyo 12 bilood gudahooda. Waa inaad ku sheegtaa codsigaaga nooca aad liiska ku doonayso (tusaale, waraaq ahaan ama elektaroonig ahaan).

**Xaqa Codsashada Xannibaadaha:** Waxaad naga codsan kartaa in aan la isticmaalin ama aan la wadaagin macluumaadka caafimaadka qaar ee ku saabsan daaweynta, lacag-bixinta, ama hawlaha kale. Haddii aad adigu si buuxda jeebkaaga uga bixineyso adeeg ama daryeel caafimaad, waxaad naga codsan kartaa in aanan macluumaadkaas lala wadaagin caymiskaaga. Waan "aqbali" doonaa ilaa inuu sharciga nooga baahdo in aan macluumaadka wadaagno mooyee, haddii ay arrintani saamaynayso daryeelkaaga, ama haddii aanaan awoodin inaan u-hoggaansano codsigaaga.

**Xaqa Codsashada Wadaxiriirada Qarsoodiga ah:** Waxaad codsan kartaa inaan kuula hadalno arrimaha khuseeya macluumaadka daryeelka caafimaadka qaab gaar ah ama goob gaar ah. Tusaale ahaan, waxaad naga codsan kartaa inaan keliya kula soo xiriirno marka aad joogto shaqada ama boostada. Waan aqbali doonaa dhammaan codsiyada macquulka ah. Codsi ayaa la soo gudbin karaa inta lagu gudajiro diiwaangelinta, waxaana loo diri karaa wakiilka bukaanka ee ku qaabilsan, ama Xafiiska Xog-dhawrista. Waxaa laga yaabaa inaan ku weydiino inaad codsigaaga qoraal ka dhigto.

### Gudbi Cabasho

Haddii aad aaminsan tahay in xuquuqdaada xog-dhawrista la jebiyey, waxaad xaq u leedahay inaad cabasho u gudbiso Xoghayaha Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha ee Mareykanka iyo Corewell Health. Kuma khasbanid in aad xadgudub la tuhunsan yahay u soo sheegto midkoodna Xoghayaha ama Corewell Health balse waad u soo sheegi kartaa midkood ama labaduba. Laguuma ciqaabi ama lagaagama aargudan doono dacwad aad soo gudbisay awgood.

Si aad cabasho ugu gudbiso Xafiiska Xuquuqda Madaniga ah ee Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha ee Mareykanka, gal **ocrportal.hhs.gov/ocr/smartscreen/main.jsf**.

Si aad cabasho ugu gudbiso Corewell Health waxaad ka wici kartaa Khadka Tooska ah ee Integrity lambarka bilaashka ah **877.319.0266**, iimayl u dir **privacy@corewellhealth.org**, ama cabasho qoraal ah u soo gudbi:

Corewell Health
ATTN: Chief Privacy Officer MC6481
100 Corewell Drive NW
Grand Rapids, MI 49503

### Isbedellada Ku Yimaada Ogeysiiskani

Xaq ayaan u leenahay inaan beddelno ogeysiiskani. Waxaan sidoo kale xaq u leenahay inaan dhaqangelino ogeysiiska wax laga beddelay ee macluumaadka caafimaadka ee aan horay u haynay ee adiga kugu saabsan iyo macluumaad kasta oo aan helno mustaqbalka. Waxaan soo dhigi doonaa nuqulka ogeysiiska hadda jira xarumaha, xafiisyada, iyo goobaha uu ogeysiiskani khuseeyo. Ogeysiiska waxaa ku jiri doona taariikhda dhaqangalka. Waxaa intaas dheer, nuqulka ogeysiiskii ugu danbeeyay ayaa lagu siin doonaa mar kasta oo aad iska diiwaangeliso xarunta ama xafiiska Part 2, ama lagu dhigo xarunta Part 2 si aad u hesho daawayn ama adeegyada daryeelka caafimaadka adoo ah bukaan-jiif ama bukaan-socod.

X31875 (English: X31773) © Corewell Health 01.2026